# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Yacquub Khiyaanoolihii



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: M. Kerr, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ilaah ilmo yae ma u soo diray qoyskaaga? Waa farxad xad dhaaf ah!

Isaaq iyo Rebeqa farxad laba jibaaran bay heleen. Ilaah baa siiyey mataano.

Caruurtii uurkii Rebeqa ayay isku rixriixeen. Kolkii ay bariday, ayuu Ilaah ku yidhi iyada, labada wiil midkood baa xoog badnaan doona ka kale. Sida caadada ay tahay kan ugu soo hor baxo ayaa ah ka weyn. Ugu yaraan wey dhasheen caruurtii.



Mataanihii isuma aysan ekeyn. Kii weynaa, xaad badan buu lahaa oo aad buu u koray, wuxuuna ahaa duurgal ugaadhssigana aad u yaqaano. Jacquubse wuxuu ahaa nin aamusan nin jeclaa inuu ka shaqeeyo xaafadda agagaarkeeda.



Maalin buu, Ceesow baahday. “Cunta i sii,” ayuu ku yidhi Yacquub. “Iga iibi curadnimada” buu weydiiyey Yacquub. Ceesow ma uusan ilaaineyn ballamadii Ilaah ee ahaa dhowridaa curadnimada. Hesshiis buu galay. Iminka Yacquub baa reerka u qabanayo hoggaanka ka dib markii uu dhinto Aabbahooda.



Habeenn buu Ilaah la hadlay Isaaq. "Waxaan ahay Ilaaha Aabbahaa Abraham. Waan kula jiri doonaa. Caruurtaadana waan barakadeyn doonaa." Inkasta oo Isaaq Ilaah caabudi jiray, wiilkiisa Ceesow laba haween buu guursaday oo ahaa reer Hittites, dad aan Ilaah garanaynin.





Isaaq wuu gabooba. “Fadlan ii keen hilib.” Ayuu ku yidhi Ceesow. “Dabdeed waan ku barakadeyn doonaaa.” Barakadeyntan gaarka u ah curadka reerka Aabuhu siinayo wiilkiisa ugu weyn. Ceesow durbadiiba wuxuu u cararary ugaadhsi. Laakiin Rebeqa ayaa ka horreysay. Oo waxay dooneysay in Yacquub barakada helo.



Rebeqa qorshe kale bay wadatay. Isla kolkii bay degdeg u karisy raashinkii uu jeclaa Isaaq, Yacquub bay u soo labistay dharkii Ceesow, oo dhogrtii haragii ugaadha ayay gacmaha iyo qoorta ugu soo xidhay. Isaaq aad ma uusan wax u arkayn.

Yacquub cuntadii buu
u keenay Isaaq.
“Codkaada wuxuu u
egyahay Yacquub.” Buu
yidhi Isaaq “Laakiinse
gacantaadase wxay u
egtahay Ceesow.”
Ka dib markii uu
cunay cunnadii,
Isaaq wuxuu
barakadeeyey
wiilkii ku
jilba joogsnaaa
hortiisa.



Kilkii uu Yacquub ka tagay, Isaaq waxaa u yimid Ceesow. "Waatan cuntadadaadii," ayuu yidhi. Waa la khiyanay. "Ma badeli karo barkada" ayuu odygii ku ooyay. Ceesow qalbigiisa waxaa ka buuxsamay nacayb. Wuxuuna go'aansaday inuu dilo Yacquub.





Rebeqa waxay maqashay hanjaabaaddii Ceesow. "Aad caqalka Abtigaa" ayay ku tidhi Yacquub Ilaa uu ka iloobayo walaaalkaa wixii ku dhacay. Isaaqna wuxuu ku raacay xaaskiisii in Yacquub ka doonto gabadh uu guursado reer Abtigii. Sidaas buuna Yacquu reerka uga tagay.



Habeenkaa,
Yacquub wuxuu ku
seexday barkin dhagax ah.
Laga yaabe inuu keligii
ahaa, laga yaabee inuu
cabsanayay. Laakiinse keligii
ma uusan ahayn.
Ilaah baa kula
hadlau Riyo manaam
ah oo aad
cajiib u ah.







"WAXAAN AHAY RABBIGA AABBAYAASHAADA, ABRAHAM IYO ISAAQ. WAAN KULA JIRAA. WAXAAN KU SIIN DOONAA DHULKAN. ADIGA IYO QOYSKAAGA OO IDIL DADKA DHULKAN OO IDIDLNA WAA LAGU BAKADEEYEY." Deedan ka dib markii Rabbiga la hadlay, Yacquub hurdadaii buu toosay. Isaga oo baqanaya.



Yacquub Abtigii Laabaan baa soo dhaweeyey. Yacquub wuxuu jeclaaday ina abtidii Raaxeel oo toddoba sanadood ayuu u shaqeeyey Abtigii si uu iayda u guursado. Laakiinse

habeenkii caqal galka arooska ayuu abtigii khiyaanay Yacquub.

"Tani waa Lee'ah, ma aha Raaxeel." Yacquub baa ku calaalay. "Waad i khiyaantay." "Hablaha hadba midd ugu weyn baa kolka hore la guursadaa," Laabaan baa sidaa ku yidhi. "Iminka guurso Raaxeel oo weliba toddoba sanadood oo kale ayaad ii shaqaynaysaaa."



Yacquub wuu ogalaaday sidaa.  Lagayaabee
inuu xusuuustay khiyaanadiisii
uu khiyaanay Isaaq iyo Ceesow.



Yacquub wuxuu dhalay kow iyo toban carruura.  Sanado badam ka dib wuxuu u xiisay inuu qoyskiisa dib ugu celiyo reerkiisii oo yaalay Kancaaan waalidiintiiisaana halkaa ba joogeen.



Laakiinse bal eeg Ceesow baa isna halkaa jooga ooh aa ninkii ku dhaartay inuu dilayo. Ma lagu nabadgelayaa taasi? Maalin buu Rabbiga ku yidhi ku noq reerkiinnii. Yacquub wuxuu isu keenay qoyskiisii iyo xoolahooda si ay ugu ambabaxaan gurigoodii.



Socdaal noocee ah buu ahaa. Ceesow wuxuu kala horyimid afar boqol rag!



Wax dhib ahna uma geysan. Wuxuu ku soo orday Yacquub oo laabta ku qaaday ooh ab siiyey walaalkii.  Yacquub iyo Ceesow sidaa saaxiibo ku noqdeen mar labaad, Yacquubna sidaa ayuu ku nabadgalay.



Yacquub Khiyaanoolihii

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 25-33

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16